

BOGGA KOWAAD SHARCI

SHARCI L. 33, Tr. 18 Jenayo 1975.

Calaamadaha Ganacsiga (Trade Marks and Patents).

MADAXWEYNAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA

ISAGO ARKAY Xaashidii 1aad iyo tii labaad ee Kacaanka;
ISAGO AQOONSAN Inay lagama maarmaan tahay in Jamhuuri-
yada oo dhan lagu tixgelinyo sharci keliya oo ku saabsan calaamadaha
ganacsiga;

ISAGO TIXGELINAYA Go'aankii Golaha Sare ee Kacaanka iyo
kan Xoghayeyaasha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

Qodobka 1aad

Sharciyadda lambarkoodu yihiin 1, 2 iyo 3 ee soo baxay 22-1-1955
ee ku saabsan calaamadaha ganacsiga (Trade Marks and Patents) ee
hadda ka hor looga dhaqmi jirey *dhinaca Koonfur* keliya waxay ka hir-
geleyaan dalka Jamhuuriyadda oo dhan.

Qodobka 2aad

Waxa la tirtiray sharciyada hoos ku qoran oo ilaa hadda looga dha-
qmi jiray *dhinaca* waqooyi keliya:

1. Sharci lamb. 9 ee soo baxay 6-8-1938 (United Kingdom Trade
Marks Ordinance)
2. Sharci lamb. 9 ee soo baxay 13-11-1924 (United Kingdom Pa-
tents Ordinance).
3. Sharci kasta oo ka soo horjeeda ama khilaafsan sharciga kan.

Qodobka 3aad

Sharcigani wuxuu dhaqan gelayaa maalintii uu Madaxweynaha Go-
laha Sare ee Kacaanku saxeexo, waxaana lagu soo saari doonaan Faa-
finta Rasmiga ah.

Muqdisho, 18 Jenayo 1975.